# GEEDO KAJARID

*Geed aan la rabin waa geed meel khaldan kuyaala. Ma jiro qeexitaan cilmiyeed oo loogu talagalay geed aan loo baahnayn. Magacaabidda geed aan loo baahnayn waxay ku kala duwan tahay beeraley ilaa beeraley kale. Si kastaba ha ahaatee, fahamka geed aan la rabin waa qayb muhiim ah oo ka mid ah ilaalinta beerta.*

## QEEXITAAN

Aqoonsiga geed aan loo baahnayn oo beertaada kuyaal waxay kuu ogolaaneysaa inaad isticmaasho xeelado kala duwan oo lagu maareeyo geedaha aan loo baahnayn noocyada kala duwan, taasoo ka dhigaysa xeeladaha kuwo waxtar intii hore ka badan leh. Tusaale ahaan, haddii beertaada ay leedahay Jabbaan geedkiisa aan loo baahnayn ee Knotweed, kaas oo ah nooc aadka u faafa una bata, waxaa lagugula talinayaa inaadan ku darin bacrimiyahaaga. Aqoonsiga geedaha aan loo baahnayn sidoo kale wuxuu kuu badbaadin karaa wakhti iyo tamar. Haddii geedaha aan loo baahnayn aanay ahayn kuwo waxyeello leh ama aad u faafa, waxaa laga yaabaa inaanay u baahnayn tallaabo dheeraad ah. Buugaagta, sida Weeds of Northeast (Uva, Neal, iyo DiTomaso, 1997), waxay kugu caawin karaan inaad garato geedaha aan loo baahnayn.

## KAHORTAG

- **DIYAARINTA GOOBTA:** Isku day inaad meesha kasaarto wixii geedo ah ee soo haray ee aan loo baahnayn ka hor intaadan abuurin dalag cusub. Intaas kadib gogol darinta geedaha aan loo baahnayn hoosta carrada goobta. Tani waxay gacan ka geysan doontaa cadaadinta miraha geedaha aan loo baahnayn kuwaasoo ku hoos dhuuman kara meesha aad wax ku beereyso. Meelaha aad ku abuureyso geedo muddo dheer aan qalalayn, waxaad ku dabooli kartaa aagga ku hareeraysan salka dhirtaada bacrimiye si ay u cabburaan geedaha aan loo baahnayn.
- **CARRADA IYO ISTICMAALIDA BACRIMIYAHA:** Xaqiiji in carrada cusub iyo bacrimiyuhu nadiif yihiin oo aysan lahayn geedo aan loo baahnayn. Bacrimiyaha nooca kombosti ee lagu abuuro heerar kul oo sarreeya (105°F ama ka badan) wuu wacan yahay sababtoo ah heer kulka sare ayaa dila miraha geedaha aan loo baahnayn.
- **XULASHADA GEEDAHA:** Xaqiiji in noocyada aad beereyso aysan ahayn kuwo faafa. Noocyada faafa waxaa aad loogu badinaa inay faafaan waxayna kheyraadka ama nafaqada kula tartamayaan geedaha kale ee aad isku dayayso inaad meesha ku abuudho oo ay ka baxaan. Waxay sidoo kale u muuqdaan inay ku faafaan deegaanka intaa kasii ballaaran oo ay carqaladeeyaan nidaamyada deegaanka.
- **QALAB NADIIF AH:** Aaladaha iyo weelasha dib mar kale loo isticmaalo nadiifi markii aad goob ilaa goob beertaada ka tirsan dhex socoto. Tani waxay dhintaa fursada aad geedo aan loo baahnayn ku faafin lahayd goobo cusub oo ka tirsan meesha aad wax ku beereyso.




GrowBoston
growboston@boston.gov

CITY of BOSTON

# XAKAMAYNTA DHAQANKA

- **DALAG BOOS CELIS AH:**Isticmaal dalagyo boos celis ah oo uga adkaan kara geedaha aan loo baahnayn tartanka loogu jiro biyo, iftiinka qorraxda iyo nafaqada dhulka kujirta. Marka ay qurmaan, dalagyada boos celiska ah waxay sidoo kale u dhaqmaan sidii derin organik ah oo uumisa geedaha aan loo baahnayn, taasoo ka hortagaysa koritaankooda. Dalagyada boos celiska ah qaarkood sida winter rye,xataa waxay soo saaraan sunta la dagaalanta geedaha yaryar ee aan loo baahnayn markii ay burburayaan.
- **DALAG ISKU BADBADALID:** Qorshee inaad isku badbadasho dalagyadaada midba marna aad abuurto si hadba aad u abuurto noocyo dalagyo ah oo saynis ahaan kala jaadjaad ah adigoo ku abuuraya goob gaar ah xili ilaa xili kale. Tani waxay xadidaa awooda geed aan loo baahnayn uu kula qabsado geed la abuuray oo gaar ah uuna dhaawac weyn ugu geysto dalagyadaada.
- **ABUUR KA BADIN:** Tani waxay ku lug leedahay isticmaalka in badan oo ah dalag boos celis ah si ku celcelis ah ayadoo loogu beerayo meelo bannaan oo beertaada dhexdeeda ah. Abuur ka badin waxay saamaxdaa dalag inuu ishirgaliyo uuna ku soo xoomiyo geedo aan loo baahnayn goobtaas.



Sawir Khiyaali ah oo ay Qortay Olivia Golden

# MAAREYNTA GEED AAN LOO BAAHNAYN

- **KA HORJOOGSO INUU DHALO MIRO:** Cawimaad ayay leedahay in geedaha aan loo baahnayn la siibo intaysan ubxin ka hor ama aysan miro dhalid bilaabin. Haddii aadan gaari karin geedaha aan loo baahnayn kahor intaysan ubxin, waa muhiim inaad siibto intaysan bilaabin inay dhalaan miro waaweyn. Tani waxay ka hortagi kartaa geedaha aan loo baahnayn inay faafaan iyo inay sababaan dhibaatooyin intii hore ka weyn gudaha beertaada.
- **GACANTA KUSIIB GEEDAHA AAN LOO BAAHNAYN EE XIDIDADA DHAADHEER:** Ayadoo aaladaha beertu ay carqaladeyn karaan geedaha aan loo baahnayn, in gacanta lagu siibo geedaha aan loo baahnayn guud ahaan waa mid ka mid ah hababka organik-ga ah ee ugu wax ku oolsan ee maareynta geedaha aan loo baahnayn ee loogu tala galay dhul wareegsan oo yar. Markii aad siibayso geed aan loo baahnayn, isku day inaad siibto geedka oo dhan, ayadoo uu kujiro nidaamka xididka oo idil. Haddii qeyb ka mid ah qaab dhismeedka xididka lagu dhaafo sideeda, geedku dib ayuu usoo bixi karaa mar kale.
- **FOGEYNTA GEEDAHA AAN LOO BAAHNAYN EE FAAFA:** Haddii aad ogaato in geed aan loo baahnayn oo beertaada kuyaala uu yahay nooca faafa, waa habdhaqanka ugu wacan inaad siibto geedka oo idil oo uu kujiro qaabdhismeedka xididka, inaad ku riddo weel xiran ama jawaan aadna ku dhex tuurto qashinka. Bacrimiyaha nooca kombosti inaad geed aan loo baahnayn oo faafa ka dhigato waxay saamaxi kartaa inuu ku dhex faafo beertaada.

**Isha xogtaan laga soo qaatay waa:** NYC Parks GreenThumb, University of California Agriculture and Natural Resources, Southwest Corridor Park, University of Massachusetts Extension, USDA Natural Resources Conservation Science.